WARSIDE
ERGADA CAALAMIGA AH EE LAANQAYRTA CASE E SOOMAALIYA
DAABACAAD NO.3 JANUARY 2014

GARGAAR

SOOMAALIYA : DHIIRIGELINAYA JOOGTEYNTA DHAQAALAHA

Dalka Soomaaliya, toboneeyo sanno oo colaad iyo masiibooyin dabiici ah ayaa waxay jahawareer ku rideen hab nololeedka caadiga ah ee dadkeeda dulqaadka leh. Cawaaqibka laga dhaxlay wuxuu noqday in Soomaali badan ay noqdaan kuwo fuqara ah aan waxba haysan taasoo keentay inay la hardamaan helitaanka waxyaabaha aasaasiga u ah noloshooda.

Si loo yareeyo saameynta dhibaatooyinka soo noqnoqday ee nolosha, Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas (ICRC) ayaa waxay sanado badan fulinaysay barnaamijyo loogu talagalay in lagu xoojiyo awooda bulshada ay ku hormariyaan noloshooda iyo inay ka soo kabtaan dhibaatooyinka.

Hayaddu waxaa lagu yaqaan ka jawaab bixinta wax ku oolka deg degga ah ee xaaladaha gargaarka deg degga ah. Hase yeeshee, barnaamijka gargaarka ee ICRC-da wuu ka badan yahay howgalada samafaleed ee muuqda baaxada weyna leh. Xaqiidii, howsha ugu weyn ee ay qabtaan shaqaalaha ICRC-da markay dejinayaan barnaamijyada gargaarka waxay taageero u dhisaan soo kabashada nolosha iyagoo ku daraya bilowga jawaabtooda, taasoo qeyb ka ah fakirkooda shaqo-xirfadeed ee ka soo burqatey 150kii sanno ee ugu dambeeyey ee kaalmeynta dhibanayaasha colaadaha.

Sidaa darteed, mashaariicda taageerada ee nolosha waxay la xiriiraan bilowga jawaabta ilaa iyo qalalaasaha ilaa howlo samafal nolol badbaadin ah, iyadoo labadan qeybood ay is kaabayaan.

Afarta qeybood ee habka nolosha aad loou yaqaano Soomaaliya waa : xoolaha, beeraha, kaluumeysiga iyo ganacsiga/farsamada. Barnaamijyada ICRC-da waxay kobciyaan qebahan iyadoo adeegsaneysa hindiso iyo tiknoolijiyad cusub marka laga maarmaanka ay tahay.

Hadafka laga leeyahay waxay tahay in la kobciyo awooda dadka si ay u helaan daqli ay ayagu iska leeyahiin. ICRC-da waxay ku caawisaa hab-dhismeedkooda, haday yihiin ganacsato yaryar, xoolo badin iyo tababar xagga xirfadda ah. Waxaan xaqiijinaa inay tahay talaabo waqtiga fog saameyn ku yeelaneysa nolosha dadka. In ka badan hal milyan oo qof ayaa ka faa ideysta mashaariicdan oo kale, waxaan rajeyneyaa in kooxdeyna ay gaaraan natiijo sidan oo kale sanadkan.

Inkastoo colaada iyo masiibooyinka dabiiciga ay sii ragaadiyeen dadka aad u nugul ee Soomaaliya sanadka 2013-da, iyaga iyo ICRC-da ma heysan wado kale oo aan ahayn inay sii wadaan dadaalkooda ah gaarista mustaqbal fiican oo laga maarmo ka soo kabsasho dhibaatooyin.

Patrick Vial
Madaxa Ergada

ICRC
Guddiga Caalamiga
ee Laanqeyrta Cas

BEERAHA: GOOSANYA BEERA HA IYADOO LAGU JIRO XILI ADAG

Qeybo soo kordhaya oo ah bulshada Soomaaliyeed waxay ku tiirsanyihiin dalagga ay soo saartaan kaa oo u ah dakhliga soo gala oo dhan amaba qeyb ka ah. Dhibka ka soo gaarey colaada ayaa hadana beeraleydu waxay u nugul yihiin abaaraha iyo fatahaadaha. Caawimaada dhanka beeraha waa mid ka mid ah dariiqyada hubanti ka dhigeysa in beeraleyda ama dadka ku tiirsan wax soo saarkooda ay helaan dhaqaale fiican oo muddo sii jira. Tan iyo bishii Jannaayo, sannadkan oo keliya, ICRC waxay caawimaad dhanka maalgelinta beeraha ah u fidisay beeraley tiradoodu gaareyso 246,000 kuwaas oo ku kala nool gobolada Hiiraan, labada Shabeele, labada Jubbo iyo maamulka Puntland si ay u sii jirto beerafalashadooda iyo habnololeedkooda.

Gobolka Hiiraan – Soomaaliya – ICRC-da waxay beeraleyda siisaa qalab lagu fasho beeraha iyo abuur.

Waxaan raacnay Cali oo ah aabbe leh shan caruur oo ICRC ka helay abuurka khudaarta iyo midka kale ee caadiga ah wuxuuna yiri, "waxaan billaabay in beerteyda aan ka shaqeysto, dhul beereedka aan leeyahay ayaan ku beeray abuurka misna waraabiyey." Si loo fududeeyo hawshooda beeraha ayaa beeraleydu waxaa loo qeybiyey qalabka beeraha oo gacanta loogu shaqeeyo, cagaf beerahooda logu carro gediyo iyo matoorada waraabka beeraha. Kanaalo badan oo dib loo dayactiray ayaa beeraleydu waxay ka heleen biyo ay ku waraabsadaan beerahooda. Aabe Cali wuu ku qanacsanyahay kaalmadaas helay wuxuuna noo sheegay, " waxaan goostay miro iyo khudaar waxaana sameeyey faa'ido gaareysa $ 1,850." Wuxuuna sharxay sida faa'idadaas u caawintay qoyskiisa.

Cali oo qare ka goosanaya beertiisa

Sannadka 2013, ICRCdu waxay bilowday mashruuc cusub kaa oo daneynaya in dib loo abaabulo hadana dib loo dhiso awoodda 20 Iskaashato beeraley ah. Tani waa meesha qeybta muhimadda leh ee xagga taageerida beeraha ayadoo muujineysaa in bulshadu ay ku taagantahay jidka dib u soo kabsashada. Halkii dibadda laga taageeri lahaa, Iskaashatada waxaa la siinaya tababar iyo qalabka ay ugu baahantahay in ay ku qabato dhammaan adeegyada fidinta ah oo ay siineyso xubnaheeda. Iskaashatooyinku waa la taageeraya si ay u soo saaraan hadana u keydiyaan abuur tayo leh, waxay kaloo bixineysaa addegga carro gediska ayadoo adeegsaneysa cagaf cagafyada ka heshay ICRC. Iskaashatadu waxay kaloo qeybineysaa abuurka khudaarta oo dibadda laga keenay dhammaana qiime kabis lagu sameeyey

Guntii iyo gunaanadkii, ICRC waxay beeraleyda dhibaateysan ku taageertaa sidii ay ugu gudbi lahaayeen hannaanka isku xirxiran oo adag kaa oo lagu gaaro dib u soo kabasasho; taa oo beeraleyga keligiis uusan qabsan karin. Si loogu hortago fatahaada, dayactirka dhulbeereedyada iyo bixinta qalab tayo leh ilaa bulshada si isku filan ay u maareeyaan iskaashatadooda iyo howlaha fidinta beeraha. ICRC-da waxay had iyo jeer tahay gacan kaalmo bixisa.

Inta ay socotay colaada Soomaaliya,beeraleyda inta waxay ku qasbanaan jireen inay ka cararaan tuulooyinkooda dagaalada dartood, inta badan bilooyin hadeysan ahayn sanado. Xaaladahan oo kale, daadad, kurto iyo cayayaan kale ayaa baab'biya dhulkooda laga cararay. Marka ugu dambeyn ay soo laabtaan beeraleydan, ICRC waxay ku kaalmeysaa inay dayactirtaan dhulkooda iyadoo u flaeysa beerahooda. 2012-kii, in kabadan 20,000 qoys ayaa waxaa loo dayactiray berahooda iyadoo loo marey kaalmada ICRC

Tuulo goolka Hiiraan, Soomaaliya-Muumina waa beeraley ka faa'ideysatay mashruuca dib u dhaqangelinta dhul beereedka oo ay ICRC hirgelisay oo beerteeda ka shaqeyneysa.

ICRC waxaa kaloo qaybisaa abuur tayo leh si beeraleyda loogu taageero sidii ay wax soo saarkooda u hormarin lahaayeen. Abuur tayo fiican leh kaas oo yaqaan deegaanka iyo abaaraha. Abuurka khudaarta oo suuqyada goobta oo mar kasta laga helin ayaa loo qaybiyaa beeraleyda danta yar. Abuurka daaqa xoolaha ayaa la siiyey dadka beeraha iyo xoolahaba ku shaqeysta si loogu caawiyo sidii ay u joogteyn lahaayeen waxa ugu muhimsan oo ay ka helaan habnololeedkooda- xoolaha nool.

ICRC-da waxay dhaqaalo badan gelisaa sidii loogu hortagi lahaa daadadla iyadoo sare u kicineysa jiinka webiga iyo iyadoo xireysa goobaha qatarta ah ee biyahu ka soo burqadaan. Bilahii dhowaa, in ka badan, 20 mashruuc oo loogu talagalay daadadka ayaa waxaa laga fuliyey Shabeelaha Hoose, Shabeelaha Dhexe, Gedo iyo Hiiraan. Qaar ka ka mid meelaha biyaha ka soo baxaan ee sababay fatahaaadii weyneyd ee 2012 gobolka Hiiraan ayaa la xiray iyadoo la fuliyay mashaariic ay dadka ka qeyb qaateen taasoo badbaadisay nolol. Sidoo kale, ICRC-da waxay isku daydaa inay habka waraabka u balaariso beeraleyda kuwaasoo ku tiirsan roobab aan la saadaalin karin waxsoosaarka beerahooda. Ilaa iyo hadda, sanadkan 2013, in ka badan 100,000 mitir oo kanaalada waraabka ah ayaa ayaa la dayactiray ama la dhisay iyo in kabadan 300 bamka waraabka ayaa la bixiyaey, taasoo u suuraelisay beeraleyda abarata u jilicsan inay si joogta wax u soo saaraan.

Beledweyne: Soomaaliya: Shaqaalaha ICRC iyo odoyaal taagan bar lagu dayactirayo kanaal

XOOLAHA: KA SOO KABSASHO AAYAR AH EE BURBUR BA'AN

Dalka Soomaaliya, in kabadan 50% bulshada waxay si weyn ugu tiirsan yihiin xoolaha isticmaalka iyo ganacsiba. Nolosha xoola dhaqatada waxaa siyaabo kala duwan u saameeyeey colaada daba dheeraatey. Abaaro soo laablaabtay, adeega xanaanada xoolaha iyo qaababka shahaadeynta caafimaadka xoolaha oo meesha ka maqan kaasoo muhiim u ah ganacsiga caalamiga ee xoolaha wuxuu yareeyey awooda xooladhaqatada ay ku nagaadinayaan noloshooda. Xoolo dhaqato badan waxaa qasab ku noqotay inay raadsadaan ilo kale oo daqli ka helaan waxayna u weecdeen beerashada halka kuwa kale oo badan ayba ka baxeenba xoolo dhaqashada.

burburkii adeegii xanaanada xoolaha ee Soomaaliya iyo Somaliland wuxuu suuragaliyey le'shada xoolo badan oo markoodi horaba ay ragaadiyeen isticmaal badan ka dib markii dadku ay ka carareen goobaha colaadu saameysey. Sidaa darted ICRC-da waxay abaabushay olole lagu daweynayo xoolaha xiliyada qalalaasaha si loo caawiyo xoolodhaqatada.

Muqdisho - Dumar baranaya sida loo sameeyo shabaqa lagu kaluumaysto

WAAXDA KALLUUMEYSIGA

Qeybta kalluumeysiga waxaa laga yaaba in ay tahay tan sida aadka ah loo dayacay waana qeybta sida aadka colaada u waxyeeleysay. Burcad badeednimada, maraakiibta shisheeye oo ka faa'ideysanaayaan xeebaha aan la ilaalin ee Soomaaliya, maraakiibta caalamiga ah iyo xaqiiqooyin kale ayaa waxay kalluumeysatada u diideen in ay isticmaalaan kheyraadka muhiimka ah ee badda ku jira.

ICRCdu waxay isku dayeysaa in ay hagaajiso xaalada ayadoo bilaabeysa in dalka gudihiisa laga soo saaro qalabka kalluumeysiga iyo hannaanka suuqgeynta. Mashruucan, haweenka waxaa la baraya habka loo tidco shabaagta iyo sida loo diyaariyo xariga lagu xiro makaalinta. Mar ala markii la tababaro, ICRC waxay iskaahato ahaan ayey u habeyneysaa dumarka isxilqaamay kuwaas oo soo saara hadana gada amba kireeya qalabka kalluumeysiga. Ragga ayaa intii goortaas waxaa la siiya tababar xagga sameynta iyo dayactirka doomanka iyo huuri .

Si loo dhiso awooda bulshada, ICRC waxay taageertaa Iskaashatooyinka Kalluumeysiga sidii ay u hormarin lahaayeen suuq geynta wixii ay soo jilaabteen ayadoo la dhisaayo suuqyada kalluunka iyo ayadoo la hormarinaayo qalabka loo adeegsado qaboojinta.

Sidee bay ICRCdu u caawimeysaa si dhibaatooyinka wax looga qabto?

ICRCdu waxay qaadatay laba qaab oo kala duwan si wax looga qabto dhibaatooyinka soo foodsaaray xoolodhaqatada Soomaaliya ku nool.

Kow **Xoojinta Adeegyada Caafimaadka Xoolaha**: Tani waxa loo maraya ayadoo la dhisaayo awoodda wax qabad ee wasaaradaha ku shaqada leh xoolaha ayadoo la qalabeynayo xafiisyadeeda

Cont. Pg.4

WAREYSI LALA YEESHEY AWEYS NASIR KHAN, ICRC SOOMAALIYA DHAQTAR KHALIIN XOOLAHA

Aweys Nasir Khan wuxuu ka shaqeynayey Soomaaliya in ka badan lix sanno. Wuxuu ka soo shaqeeyey Pakistan, Yemen, Sudan and dhowaana Soomaaliya. Wuxuu si weyn ugu socdaaley Soomaaliya, isagoo suura geliyey xooladhaqatada inay helaan gargaar ay aad ugu baahnaayeen xoolahooda.

Aweys Nasir Khan, ICRC Soomaaliya dhaqtar khaliin xoolaha

Maxay yihiin dhibaatooyinka ugu muhimsan oo ay la kulmaan xoolo dhaqatada Soomaaliyeed ?

Xoolodhaqatada iyo qoysaska ku hawlan xoolaha iyo beerahaba waxay muddo wajahayaan dhibaatooyin xili xili ah iyo mid muddo badan soo jirtay. Xillligii qiimeyntii hore oo Soomaliya ku sameynay dadka xoolaleyda ahi waxay la kulmeen abaaro soo noqnoqday, cuduro ku dhaceen xoolahooda,biyo iyo daaqa yari kuwaan oo ah kuwa ugu caamsan oo dhaqaale ahaana waxyeelaya dhaqaalaha qoysaskooda.

Dhibka ugu weyn oo xooladhaqatadu la kulmeen kaa oo xilli walba saameey habnololeedkooda mida ugu weyn oo joogtana ah waa cudurada xoolaha ku dhaca. Arrintan waxaa sabab u ah addegga caafimmadka xoolaha oo aan dhameystirneyn taa oo sabab u ah colaada sokeeye oo dheeraatay oona fududeysay cuduradada xoolaha ku dhaca. Intaa waxaa dheer, wasaarada xoolaha oo awoodoodi ay kaga hor tagi lahaayeen cudurada ku badan xoolaha oo qalabkii ay u adeegsanlahaayeen iska kooban taana waxay keentay in xoolaleyda ku tiirsanaadaan gargaar dibadeed haddiiba la helo.

Sidee bay dhibaatooyinkan u waxyeeleynayaan dadka?

Soomaaliya oo meelo badan ka jirto dhibaatooyin daran ayaa xoolo dhaqato badan iyo xoolahoodaba u qaxay meelo kale oo nabad ka jirto. Qaar xoolahoodi waa ay ka lumeen colaada darteed, kuwii wax yar u hareyna ay iska iibinaayaan si ay baahida daran ee qoyskooda haysato wax ugu qabsadaan. Taa waxaa dheer in aan jirin adeegga caafimaadka xoolaha, cudurada xoolaha oo meel sare joogo iyo kaabayaasha oo liita ayaa wax soo saarka xoolaha wax u dhimay taa oo habnololeedkii xoolaleyda saameysay.

Shaqaale caafimaadka xoolaha ee bulshada oo eegaya xilli dhaqtar xanaanada xoolaha ah uu siinayo dawo goryaanka loogu daweynayo neef ari ah intii ay socotay daweynta xoolaha ICRC, Dhidin Caraale, Puntland, Soomaaliya. ICRC-da waxay bixisay dawo, iyo dhaqaale lagu taageerayo kooxaha xanaanada xoolaha ee goobta jooga. Waxay kaloo tababartay farmashiistayaal gobolka jooga.

Shaqaalaha xanaanada xoolaha ee Soomaaliya waxaz daweynayaan geel intii lagu jiray olalaha daweynta ICRC ee Dhidin Caraale, kyu dhowaad 40 km galbeed-ka Garowe, Puntland, Soomaaliya. Olalaha halka bil ah waxaa loogu talagalay in lagu daweeyo hal milyan oo xoolo ah

Cont. from Pg.3

WAREYSI LALA YEESHEY AWEYS NASIR KHAN

xanaanada xoolaha ee degmada amaba xarunta caafimaadka xoolaha iyadoo waxaa la dardargelinaaya Shaqaalaha Bulshada oo ka shaqeeya Caafimaadka Xoolaha iyadoo haddana la hormarinaayo xiriirkooda ay la leeyihiin hay'adaha gaarka loo leeyahay iyo wasaaradaha ku shaqada leh. Inta lagu jiro sannadka 2013, waxaan rabnaa in aan taageerno laba xarumoood oo lagu daweeyo xoolaha Soomaaliya oo dhan iyadoo dib loo qalabeynayo Shaqaalaha Beesha oo ka shaqeeya caafimaadka xoolaha (*Community Animal Health Workers*) Soomaaliya oo dhan. Waxyaalaha kale oo la qabanaayo ayaa waxaa ah xoolaha oo laga daweynayo cudurada keena dulinka iyadoo lala kaashanaayo Wasaaradda Xannaanada Xoolaha. Hawshan waxay diiradda saareysaa 2.4 neef (kana faa'ideysanaaya in ka badan 150,000 xoolaley kuwaas oo ku kala sugan waqooyi iyo batamaha Soomaaliya. Intaa waxaa dheer, waxaa kaloo farmashiyayaasha gada daawada xoolaha ku caawinaa sidii ay u horumarin lahaayeen adeegyada ay bixiyaan.

2) Xoolo qeybin: Tani waa mashruuc cusub oo ICRCdu hirgeliso. Waqtigan hadda ah ICRCdu waxay xoolo u qaybineysaa dadka soo barakacay ee ku jira xerooyinka dhawr ah ee koofurta Soomaaliya kuwaas oo dib ugu laabanaaya meelihii awal ka soo barakaceen. Qoyk walba waxaa la siinaya in xoolo ah oo macquul ah kana kooban 10 neef oo ari ah oo dhalaya. Sannadka 2013, ICRC waxay rabtaa in ay taageerto 3,500 qoys oo dib ugu laabanaaya meelihii awal ka yimaadeen.

Maxay yihiin caqabadaha ICRC la kulmaan marka ay timaado wax ka qabashada dhibaatooyinka xoolaha nool haysato?

Ammaanka waa midda ugu weyn oo ay kooxdeena ahmiyadda siiyaan, taa waxaa soo raaca helitaanka daawada xoolaha oo tayo leh wadatana shahaado oo aan ka helno kuwa aan ka qaadano daawada xoolaha oo ku sugan gudaha Soomaaliya waa caqabad kale.

ICRC
Guddiga Caalamiga
ee Laanqeyrta Cas

ICRC Somalia Delegation
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi - Kenya
www.icrc.org
© ICRC, January 2014

Photo cover: Ahmed Farah/ICRC

WAAJIBAAD SHAQO

ee Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas (ICRC) waa urur aan eexan, madaxbanaan dhex dhexaadna ah kaasoo howshiisa aadaninimo kaliya tahay inuu dhowro nolasha iyo sharafta dhibanayaasha dagaalada iyo xaaladaha kale ee qalalaase iyo inuu siiyo gargaar dhibanayaasha collaadaha. ICRC-da waxay kaloo ku dadaashaa inay ka hortagto dhibaatada iyadoo horumarinaysa xoojinaysana xeerka aadaninimada iyo mabaadiida caalamiga ee aadaninimada. Iyadoo la aasaasay sanadkii 1863dii, ICRC-du waa asalka Axdiyada Jeneefa iyo Dhaqdhaqaaqa Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas. Waxay jihaysaa ayna isku dubaridaa howlaha caalamiga ah oo ay qabato Dhaqdhaqaaqa xiliyada colaadaha iyo xaaladaha kale ee qalalaasaha.

2014.0007/402